



Tallaabooyinka Colorado oo Guusha Waxbarashada Isticmaalidda Warbixinta Buundada CMAS si aad u Taageerto Guusha Tacliineed ee Ilmahaaga



www.cde.state.co.us

Qiimaynaha Tallaabooyinka Colorado ee Guusha Tacliineed (CMAS) ee farshaxanka luuqadda Ingiriisida, xisaabta, sayniska iyo cilmiga bulshada waxay waafaqsan yihiin Heerarka Tacliineed ee Colorado waxayna cabbiraan xirfado murugsan sida xiska naqdiga iyo xallinta mashaakilka. Warbixin buundeed ayaa loo sameeyaa arday kasta oo galay imtixaanka CMAS. Warbixinaha waxa ku qoran macluumaad ka caawin doona waalidiinta inay si fiican u fahmaan halka ilmahoogu ka taagan yahay buuxinta filashooyinka Heerarka Tacliineed ee Colorado iyo haddii ilmahoogu ku taagan yahay dhabbaha uu ugu gudbayo kuuliyad ama shaqo kadib qalinjabinta.

Waxyaalaha Xasuusta Mudan

- Imtixaanada CMAS waxay waafaqsan [yihii Heerarka Tacliineed ee Colorado](#), kuwaasi oo ah sida jid khariiradeed ka caawinaya hubinta ardaydu inay diyaar u yihiin kuuliyad, shaqo iyo nolol. Gu'gii 2018, heerarka tacliineed ee gobolka wax ayaa laga baddalay sida uu dhigayey sharciga gobolku. Heerarka Tacliineed ee Colorado ee dib loo eegay wali dhaqangal noqon maayaan ilaa laga gaarayo sanad dugsiyeedka 2020-21, imtixaanada gobolkuna waxay waafaqsanaan doonaan heerarka wax laga baddalay marka wakhtigaas la gaaro. Degmooyinka dugsiyadu, macallimiintu iyo ardaydu waxay haystaan sanad kale oo ay ugu guuraan heerarka iyo imtixaanada gobolka ee cusub.
- Imtixaanada CMAS waxa la bixiyaa dhammaadka sanadka, waana **kaliya hal tilmaame** oo lala isticmaali karo kaararka warbixinta, waxqabadka fasalka iyo jawaabcelinta macallinka si loo bixiyo sawir buuxa oo ku aaddan horumarka ardaygaaga.
- Imtixaanadu waxay cabbiraan xirfadaha ardaydu u baahan yihiin maanta – sida awoodda ay naqdin leh ay ugu fekeri karaan una xallin karaan mashaakil murugsan.
- Ogaanshaha fasalada hore haddii ardaydu buuxinayaan filashooyinka heerka fasalka waxay siisaa waalidiinta iyo macallimiinta wakhti ay si fiican ugu diyaarin karaan ardayda kuuliyad iyo shaqo kadib dugsiya sare.

Sideen U Taageeri Karaa Ilmahayga?

- La shaqee macallinka ilmahaaga si loo aqoonsado farsamooyinka lagu xoojinayo waxabrashada ilmahaaga halka isaga ama iyadu hadda ka hor ay ka buuxinayso ama ay xad dhaaftay filashooyinka heerka fasalka. Sidoo kale, macallinka ardaygaagu waxa uu caawin karaa aqoonsashada khayraadka si loo horumariyo waxqabadka ardaygaaga halkii uu u baahan yahay. Waxbarida gaarka ah, barnaamijyada dugsiya ka dambeeya ama hawlaha xaga guriga ee la heli karo inay ka caawiyaan ardayda inay dabbqaan xirfadahooda.
- U xaqiiji ardaygaaga in **buundooyinka imtixaanadku kaliya yihiin hal tilmaame horumar**.
- Go'aan ka gaadh ka uu yahay xirfadaha lagu xoojinayo guriga. .Kala qaybinta sharaxan ee xirfadaha gaarka ee warbixinta buundada ardaygaaga waxay u shaqayn sidii meesha wayn ee bilaabida wixii ah aqoonsiga dhinacyada u baahan horumarinta.
- Ka doono macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan Heerarka Tacliineed ee Colorado iyo qiimaynaha waafaqsan, oo ay kujiraan hage waalid oo ku aaddan fahmida warbixinaha buundada iyo Su'aalaha Badanka la Iswaydiiyo halkan: www.cde.state.co.us/communications/resourcesforparents

Halkee wax badan ka baran karaa?

Heerarka Tacliineed ee Colorado ee adag waxa loogu talagalay hubinta in dhammaan ardayda Colorado ay u diyaarsan yihiin guulaysiga kuuliyadda iyo shaqada. Qiimaynaha Colorado waxay waafaqsan yihiin heerarka gobolka, iyagoo ka caawinaya barayaasha iyo waalidiinta inay ogaadaan sida ay ardaydu wax u wadaan una korayaan marba marka ka dambaysa iyo sida ay yihiin marka la barbardhigo filalkooda degmada iyo gobolka oo dhan.

Si aad wax badan u ogaato, booqo: www.cde.state.co.us/communications/resourcesforparents